

# HAGAAJINTA RAINIER

## Calaamadda Cusub iyo Isgoyska Wadada Rainier iyo Rose 2020



### MAXAA ISBEDDELO LOOGU SAMEEYNAYA RAINIER/ROSE?

Isgoyska Rainier iyo Rose waa mid ka mid isgoysyada ugu sareeya ee shilalka ee ka dhaca Rainier. Inta badan shilalka dhaca waxay dhacaan marka wadayaasha ay ka leexanayaan bidix ama ka leexiyaan Rainier dad badana way ku lug leeyihiin dadka lugeynaya. Waxaan ka shaqeyneynaa inaan ka dhigno mid xasilloon oo kaamil u ah qof kasta.

### MAXAA ISBEDELAYA?

Waxaan la wadaagnay 2 xulasho oo kala duwan derisyada iyo Jaaliyadaha Itoobiya ee Seattle soo booqdayaasha (qiyaastii 100 qof wadarta). Waxaan maqalnay dadka badankood waxay doonayaan casriyeyn ka socota calaamadaha meelaha dadku ku lugeeyaan ee hadda jira una sameeyaan nalalka signalka oo buuxa (4-way)

Waxaan soo uruurinay deeq-lacageed waxaan hadda ka shaqeyneynaa naqshadeynta tilmaame buuxa oo ay ka mid noqon doonaan isgoysyo cusub oo dhinaca oo dhanka waqooyi, waddo cusub oo loo leexdo, iyo kordhinta labo ka mid ah geesaha lagu lugeeyo.

Si loogu oggolaado meel bannaan oo loogu talagalay leexashada dhanka bidix, waxaan u baahan nahay inaan ka saarno baarkinka dhinaca galbeed ee waddada. Waxaan ognahay in baarkinka uu

aad muhiim u yahay, sidaa darteed waxaan ka shaqeyneynaa inaan ku darno aag cusub oo dejinta ah si aan u taageerno ganacsiyada, waxaan ku dari doonnaa baarkin cusub dhinaca bari ee wadada.

Tani waxay hagaajin doontaa amniga iyadoo la abaabulayo isgoyska iyo in si fiican loo fududeeyo leexashada bidix. Waxay sidoo kale ka dhigaysaa ka gudubka wadada mid aad u raaxo badan dadka lugeynaya si ay u qaadaan baska una booqdaan meheradaha maxalliga ah. Waxaan rajeyneynaa inaan dhiso horumarintan sanadka 2020.

### NAGALA SOO XARIIR

Xor baad u tahay inaad nagala soo xiriirto su'aalaha ku saabsan RainierAveS@Seattle.gov ama 206-727-8697. Waxbadan ka baro [www.seattle.gov/visionzero/projects/rainier-ave-s](http://www.seattle.gov/visionzero/projects/rainier-ave-s).

Waad ku mahadsantahay caawintaada si looga dhigo Rainier mid ammaan ah



**Seattle**  
Department of  
Transportation

